

BUUGA DHAMAAN SHARAX EREYDA
SOOMALIGA EE F4 ka.

CUTUBKA 1aa

- 1:Bariiso=Waa erey Soomaalidu Utaqaan Roobka Barqadii Da'a.
- 2:Biriq=Waa daliinta holoca ee la socota biyaha danabka.
- 3:Biyojiid=Waa roobka biyo badan oo soo rogmada leh.
- 4:Cir=Waa magaca afka soomaaliga loo yaqaan samada ina ka saraysa.
- 5:Daad=Biyaha rogmanaya ee roobka ka dib.
- 6:Daadxoor=Waa qashinka iyo xumbada dhulka daadku maray kusoo hara.
- 7:Danab=Waa biyo heerkulkooda aad u sareeyo oo ka abuurma kolka biriqdu dhacayso.
- 8:Daruur=Waa uumibax adkaaday oo biyo xambaarsan.
- 9:Kadsoomid=Ku qaldamid.
- 10:Dhaandabagaale=Waa Muuqaal biyaha U eg ee xilliyada kuleylaha ka muuqda dhulka bannaanka ah.

CUTUBKA 2aad

- 11:Xuurto=Neeftuur.
- 12:Jibaal=Labaatan talaab oo afar gees ah.
- 13:Moosid/Wanjaleyn=Sameynta jibaalka oo ah kolka dhulka la kala xirxirayo.
- 14:Tacab=taban tallabo oo ballac ah iyo sodon tallaabo oo dherer ah qaab laydi ah.
- 15:Geed qaad=Geedagoyska lagu sameeyo aagga la beerayo.
- 16:Kawaawe=Ul Dheer oo Hoosta lagaga xiro bir ballaaran iyo xarrig labada gees ah oo beerta lagaga celiyo biyaha badan iyo bacaadka oo dhulka lagu mooso
- 17:Miige=Ul madax ballaaran oo Dhulka lagu qodo kolka beerta la abuurayo.
- 18:Jaan=Cows ama dhirta yar yar ee Beerta laga Guro kolka lafalaayo.
- 19:Biqil=kolka miraha abuurka ahi bixid bilaabaan.
- 20:Waraf=Xirig Dhexda Uballaaran Oo Leh laba Lugood,dhagax ama bur carro ah ayaa lagu tuuraa.
- 21:Alan=Xubinta laanta balka ee baxaysa.
- 22:Qaran=Laanta mesegada ee galleyda.
- 23:Bal=Geedka galleyda iyo mesegada laamaha iyo caleenta.
- 24:Sabuul=Miraha mesegada ama galleyda marka aa ku yaallan jafka.
- 25:Karoor=Goobta lagu ururiyo sabuulka.
- 26:Sumac=marka galleyda ama mesegada lagu tumo si miraha loo daadiyo.
- 27:Barooro=Soo bixida sabuulka.
- 28:Jareero=sabuulka kolka uu timaha yeesho caaneeyo.
- 29:Hoobade=Kolka sabuulka la taabto ee mirihiisu dataan.
- 30:Waago=Qashinka miraha laga bixiyo.
- 31:Boqon Dhow=Kolka lunka laga jaro jiridda ka kor.
- 32:Kabaay=Bal isku xirxiran.
- 33:Tubid=Kolka balka la is taajiyo oo madaxa la isu geliyo.
- 34:Bakeeti= Kolka balka la jiifiyo oo madaxa la isu geliyo.
- 35:Bakaar=Godka badarka lagu keydsado.
- 36:Hoole=Bir yar Oo lagu Hoolo yaanbada oo carrada lagaga xoqo.
- 37:Dhacle=Xarig madax bulay ah leh oo bixiyo dhawaaq dheer Shimbiruhu ka didaan.
- 38:raar=Dhirta waaweyn ee beerta dhextaal baa dushooda laga samaynayaa rako geedka korkiisa laga waabayo.

